

**Xeerka Wassirka Caddaladda iyo Arimaha Diinta
Sharci lamba. 25 ee 17 Disember 1967**

**Wakiilashada ku-Xigeenka Dowladda Awoodaha Wasiirka Caddaladda iyo
Arrimaha Diinta ee la Xiriirta Xeeridaamiyaha Garsoorka iyo Arrimaha Diinta**

WASIIRKA

Kadib markii la arkay 79 and 83 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay Sharciga lamba. 14 ee 1962 ee Qaabdhismeedka
Dowladda;

Kadib markii la arkay sharciga lamba. 1 ee 7 Febarayo 1965 iyo wax ka
bedelidda sida ku qoran Xeeridaamiyaha Dowladda;

Kadib markii la tixgeliyey baahida ah in la wakiisho Xoghayaha Ku-xigeenka
ee Wasaaradda Caddaladda iyo Arrimaha Diinta iyo qeybo ka tirasn howlahiisa gaar
ahaan nidaaminta garsoorka iyo arrimaha diinta.

WAXAA LA SOO SAARAY

Waxaa loo wakiishay Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Caddalada iyo
Arrimaha Diinta Mud Mohamed Dolli Hashi in uu yeesho awoodaha Wasiirka
Caddalada iyo Ariimaha Diinta sida:

- a) dhinaca xeeridaminta garsoorka sida ku qoran fawradda 2-5 ee qod 19,
faqradda 1 ee 19, faqradda 3 ee 24, faqradda 3 ee 26, faqradda 1 ee 18 xarafka a),
faqradda 2 markii laga reebo inta khuseysa Garsoorayaasha aanan ahayn muwadin
Somaliyeed, 32, faqradda ee Xeeridamiyaha Garsoorka oo lagu ansixiyey
Dekretada-sharci lamba. 3 ee 12 Juun 1962;
- b) arrimaha barashada iyo la talinta diinta.
Muqdisho, 2 Disember 1967.

Wasiirka

Aden Shire Jama

La arkay lana diwaan geliyey – diiwan lamba. 5 bogga lamba. 125

Muqdisho, 11 Disember 1967.

Xisaabiyaha Guud

Mohamed Ahmed Abdille